

# Goob Kaliya oo Wax Laga Wada Helo

Nidaamka war bixinta ee cusub ee Magaalada ee nidaamka warbixin ee onlaynka wuxuu ku siinaa meel kaliya oo si fudud looga warbixiyo wixii goobaha magaalada ee lawada leeyahay ee la iska degay. Waxaanu ka shaqaynaa meel kasta oo aan ku bixino adeegyo kala duwan oo warbixinta aad online kusoo gudbisay ah. Nidaamka waxaa loo dejiyay qaab in uu si hufan uga jawaabo ah cabashooyinka iyo tabashooyinka, sidoo kalena inay Magaaladu maamul daadajin ku samayso nidaamka ururinta xogta.

**211**<sup>211info</sup> ★ *The easiest way to find health and human services.*



**TEXT**  
zip to 898211



**DIAL**  
211



**SEARCH**  
211info.org

We can connect you with food and rental assistance, parenting resources, maternal and child health services, utility assistance, and much more.

Free. Live. Confidential.



**211**<sup>211info</sup> ★ *Dariiq fudud oo aad ku heli karto adeegyada caafimaadka iyo bilaa aadanka.*



**FARIIN U DIR**  
Zip-ka ah 898211



**GARAAC**  
211



**BAADH**  
211info.org

Waxaanu kugu xidhaynaa kaalmada cuntada iyo kirada, kaydka waalidka, adeegyada dhalmada iyo caafimaadka ilmaha, kaalmada laydhka, gaasta iyo biyada, iyo wax kale oo badan

Bilaash. Toos. Sir.



# Goob Kaliya oo Wax Laga Wada Helo

Nidaam toos ah oo loogu tala galay inuu horimariyo caafimaadka iyo badbaadada bulshada



[www.portlandoregon.gov/toolkit](http://www.portlandoregon.gov/toolkit)

[www.portlandoregon.gov/campsite](http://www.portlandoregon.gov/campsite)

[Reportpdx@portlandoregon.gov](mailto:Reportpdx@portlandoregon.gov)

Taleefan: (503) 823-4000

# Siduu u shaqeeyaa

Koombuyuutarkaaga, kagal:

[www.portlandoregon.gov/campsite](http://www.portlandoregon.gov/campsite)


Magaaladu waxay samaysay foom online ah oo kuu sahlaya inaad xogta ka bixiso marka:

- Hab dhaqan qalafsan ee soo noqnoqda ee dadka degay banaanada (Caga juglayn ama gacan qaad taas oo ka dhigan eryasho, isasoo qaad, ama feedh u qaadid. Lahadal 9-1-1 si aad markaa kaalmo u hesho, kadibna buuxi foomka hadhaw.)
- Ku sakhraamid banaanka iyo/ama isticmaal mukhaadaraad ilaa garashadu tagto (Sidoo kale, hadii ay xaalad degdeg ah tahay, wac 9-1-1.)
- Dadka degay banaanka oo jidka xidha (sida, wadada lugta, luuqaqa)
- Goobaha dadka ka dhaxeeya oo si khaldan loo isticmaalo (sida, iyada oo suuli ahaan loo isticmaalo)
- Dhismeyaal (sida, cooshado lagu qabto guryaha, guryo yaryar oo fara badan)
- Qashin fara badan iyo/ama waxyaabo sun ah (sida, siriinjyo la daadiyo)
- Waxyeelo deegaanka (sida, dhirta ama laama oo la jaro, laag laga qodo taagagga agagaarkooda, iwm .)

Magaaladu xogta aad bixisay waxay u isticmaalaysaa inay gaadhsiiso hay'adaha ay khusayso sidoo kale sidii jawaab wax ku ool ah looga bixin lahaa.

Sidoo kalena waxaad warbixinta kusoo bixin kartaa adiga oo lasoo hadlaya Taleefanka Xogta Magaalada/Degmada ee: (503) 823-4000, markaa Khabiirka Xogta iyo Gudbinta ayaa kaa caawinaya warbixinta sidaad usoo gudbiso.

Wixii xog ah ee ku saabsan shuruucda Magaalada ee Derbi Jiifka iyo guryaynta, fadlan booqo: [www.portlandoregon.gov/toolkit](http://www.portlandoregon.gov/toolkit)



## PDX Reporter ee moobaylkaaga Smartphone-ka ah

Nooca websaytka ah [www.pdxreporter.org](http://www.pdxreporter.org) waxaad iminka laga heli karaa moobaylka smartphone-ka. Noocan cusubi waxa uu noo sahlayaa inaanu si fudud, oo joogto ah, waxa ugu soo kordhino app-ka si fudud loogu isticmaali karo. Waxaanu dadka ku dhiiranaa inay joojiyaan isticmaalka iOS iyo nooca Android ee app-ka PDX Reporter ee qadiimiga ahaa maadaamo oo aan si joogto ah wax loogu soo kordhin farsamo ahaan kaas oo marka danbe gabi ahaanba meesha laga saari doono.

Si aad shaashada moobaylka smartphone-ka usoo dhigayo app-ka cusub:

- 1) Ka booqo [www.pdxreporter.org](http://www.pdxreporter.org) moobaylkaaga daaqadiisa websaytyada.
- 2) Gal adiga oo isticmaalaya magacaada iyo erayga sirta ah aad ka samaysatay websaytka Magaalada.
- 3) Soo dhigo oo kusoo dhawayso shaashada moobaylkaaga si aad si fudud ugu gali karto app-ka online-ka ah.

Su'aalo, faalooyin , tabasho?

U limeel Garee

[ReportPDX@portlandoregon.gov](mailto:ReportPDX@portlandoregon.gov)

## Hadafkaayaga

Hadafkaayagu waa inaanu bixino nidaam ka jawaabi kara baahida bulshada. Goob Kaliya oo Wax Laga Wada Helo waa nidaam loogu tala galay in lagusoo uruuriyo tabashooyinka la xidhiidha degida fagaarayaasha magaalada. Waxa uu suuro galiyay:

- Shaashad si sahlan loo isticmaali karo;
- Isticmaal dheeraad ah oo jihaysan ee ilaha magaalada ;
- Xidhiidh furan oo u dhaxeeya dhamaan ciday khusayso (sida, adeega bulshada, adeega guryaynta, bilayska, xubnaha bulshada;
- Nidaam kaliya oo badhtame ah si loo fahmo oo loo qiimeeyo meela adeegyada sida wayn looga baahan yahay.

## Goob Kaliya oo Wax Laga Wada Helo

[www.pdxreporter.org](http://www.pdxreporter.org)

[www.portlandoregon.gov/campsite](http://www.portlandoregon.gov/campsite)

[www.portlandoregon.gov/toolkit](http://www.portlandoregon.gov/toolkit)

[ReportPDX@portlandoregon.gov](mailto:ReportPDX@portlandoregon.gov)

## City of Portland

1120 SW 5th Ave, Suite 1200

Portland, Oregon 97204-1998

Taleefan (503) 823-4000

